

Delridge Way SW - RapidRide H Line Project



Delridge Line




Waxannu ka abuureynaa Delridge Way SW waddo bas oo wanaagsan si loo diyaariyo khadka cusub ee RapidRide H Line ee iman doona sannadka 2021-ka gudihiisa. Taasi waxey la macno tahay inaannu dhiseyno qeyb ka mida waddada, iyadoon gebi ahaanba beddeli doonna sida leymanka loo qaabeeyey, iyo ineynu isku xir u sameyno socotada/baaskiileysa si aad u hesho adeeg bas oo wanaagsan oo nabad ah.

Khadka RapidRide H Line wuxuu sare u qaadi doonaa baska hadda jira ee Route 120, oo ka mida leymanka ugu shaqada badan King County Metro, iyo u fidintiisa xagga wuqooyi ilaa South Lake Union. Basaska RapidRide si isdaba joog ah ayey u socon doonaan waxeyna ahaanayaan kuwo la isku halleyn karo, iyadoo adeegyadiisuna kordhi doonaan habeennadii iyo dhammaadka toddobaadka ama wiik endiga. Leymanka la hagaajiyey waqtiga socdaalkoodu wuxuu soo gaagan doonaa 10-15% boqolkiiba inta u dhaxeysa South Lake Union iyo Burien.

Maanta, boqolkiiba 34% ka mida qoysaska ku teedsan jidkaa ma heystaan gawaari u gaara, taasi oo ka dhigeysa gaadiidka dadweynaha mid muhiim u ah dadka iney shaqooyinkooda, iskuulkooda, arrimahooda, iyo adeegyadooda muhiimka ah soo fushadaan. Marka la gaaro sannadka 2035, waxanu qiyaaseynaa raacitaanka maalin kasta RapidRide H inuu sare u kaco 5,200 ilaa in ka badan 7,000 maaliintiiba.

Magaalada Seattle waxey kaashaneysaa Metro si ay u dhiso Delridge Way SW iyo in dib u hagaajin u sameysa dadka lugeynaya, baaskiilka raaca, ama raaca gaadiidka dadweynaha. Tani waxa ka mid ahaan doona dib u dhiska jidadka burburay, hagaajin ku sameynta halka dadku ku socdaan, iyo ku darista seenyaale u khaas ah bas leenka si loo caawiyo muhimadda basaska.

Jadwalka Mashruuca



RapidRide

Gaadiidka dadweynaha waa qeyb muhiim ka ah sidii aannu u dhameystiri laheyn baahida kala duwan iyo mudnaanshiyaha gobolkeena sida deg-degga ah u koraya. Magaalada Seattle iyo King County Metro waxey ka shaqeynayaan sidii loo ballaarin lahaa basaska Metro RapidRide si loo buuxiyo dalabka badanaya ee loo qabo gaadiidka iyo taageeridda helitaan gaadiid dadweyne oo lagu kalsoonaan karo, dheereeya iyo waqtigana ku yimaada.

RapidRide waxey kugu geynayaan halka aad u socoto si deg-deg ah. Waqtiga badankiisa way socdaan iyagoo in yar istaaga, iyagoo taageero ka helaya leenka basaska kaliya loogu talo galay, seenyalayaasha u gaarka, iyo hagaajinnada lagu sameeyey jidadka. Basasku waxa lagu qalabeeyey seddex albaabood oo dhammaantooda laga gelo loogana dego. Mashiinka la mariyo kaararka ORCA waxey ku yaallaan meelaha la istaago taasi oo sahasha lacag bixinta iyo iyagoo leh shaashado laga arki karo waqtiga basku imanayo.

Faa'iidooyinka RapidRide

RapidRide H Leenka wuxuu beddeli doonaa Khadka hadda jira ee Route 120, kaasi oo ah mid ka mida khadadka ugu shaqada badan ee Metro King County. Xarumaha basaska laga raaco waa la sii kala fogeyn doonaa si adeegga loo hagaajiyo, iyo in lagu soo daro dugsiimo ama daashash, nalal, iyo mashiinnada la mariyo kaarka ORCA, iyo muuqaallo muujinaya waqtiga saxda ee basku imanayo.

RapidRide H Line waxaa loo qaabeeyey inuu buuxiyo hadafka mashaariicdan:

- Sare u qaadidda waqtiga socodka ama safarka iyo ku tiirsanaantiisa dhammaan jidadka uu maro.
 - Filo in waqtiga safarku uu soo gaabto 10 ilaa-15 boqolkiiba
- Sare u qaadidda nabadda dadka socda, baaskiilleyda, iyo isku xirka gaadiidka
 - Waxa ka mida hagaajin waddooyinka socodka iyo kuwa lagu leexo iyo sidoo kale isku xirka xaafadaha loo yaqaano Neighborhood Greenways
- Yareynta sii deynta naqaska gaaska cagaaran (greenhouse)
 - Dhiirri-gelin isticmaalka qaabab kale oo gaadiid ah oo ka duwan kali gaari wadasho
- Bixin adeeg bas kaasi oo bilowda aroor hore oo shaqeeya ilaa habeenkii goor dambe, maalin kasta
 - Basasku waxa markii ay ugu yar tahay yimaadaan 10kii daqiiqo mar saacadaha shaqadu badan tahay

Delridge Way SW: Waddo Bus oo Wanaagsan

Canshuurta Move Seattle doolarkeedu wuxuu caawini doonaa dib u sameynta iyo dib qiyaasid sida Delridge qof kasta ugu ahaan karto xaafad. Waxa innaga go'an inaannu dadka soconaya iyo kuwa baaskiillada kuwa wata xaafadda u keenno xarun cusub oo baska laga raaco.

Qaabeynta waddadeena Delridge Way SW waxa ka mida:

- Leyman cusub oo bas oo si sahlan u dhaafa baabuurta
- Seenyaalayaal cusub oo basaska safka hore u fura xilliga guduudka
- Qeybo dhexe cusub si loo cagaariyo Delridge oo gaabiya baaburta
- Taallooyin farshaxan cusub oo goob bulshada abuurta ahaata
- Laamiyeyn cusub oo si sahlan loogu safro iyo jid cimrigiisu raago
- Bullaacado cusub iyo tuubooyin biyaha la cabbo iyo kuwa wasaqda
- Laymanka baaskiillada cusub, waddo-dhinaceedyada, baaskiillada/socodka, isku xirnaanta xaafadaha greenway, iftiin nalal dadka lugeeya, iyo dayactir waddo dhinaceedyada si dadku lugeynaya iyo baaskiillada wata uga adeegtaan xaafadda uguna tagaan basaska sida ugu nabad iyo raaxo badan.
- Joojinta Parkinnada – qaabka cusub wuxuu beddelayaa dhowr baloogyo oo baabuurta lagu barking gareeyo si firaaqo loogu helo layman cusub oo basaska iyo baaskiillada u gaar ah
- Waqtiga Parkinnada oo la xaddido waqtiga basaska socodkoodu ku badan yihiin laymanka u gaarka ah markaasi oo baabuurta laga dhaqaaqin doono si firaaqo loogu helo basaska maalmaha toddobaadka subax iyo galabba.

Sidee lagugu wargeliyey mashruuca

Laga soo bilaabo sannadkii 2015, waxanu la xiriireynay dad aad u fara badan oo bulshada ka mida si aannu idinkula socodsiinno qaabka shaqada sida wicitaan, iimeel, iyo hababkan kale oo dadka lagula xiriiri:

In ka badan 20 aqallo furan ah (open houses) iyo kulammo gooni ah	6 aqal furan onleen ah iyo saadaalin qaadis	5 mashruuc oo midkiiba waraaqo loogu dirayo in ka badan 9,000 adrees
--	--	---

In ka badan **20** lagu wargelinayo iskuullada iyo rugaha ganacsiyada




- Tarjumaad waraaqo caddeymo ku qoran afafka Carabiga, Fiyetnaamees, Isbaanish, iyo Somali
- Soo wicitaanno luqadaha businessyada aan soo tilmaannay ee qaba baahi tarjumaan luqad

Intii uu socday qaabeynta, waxanu sameynay tiro isbeddello si aannu buuxinno baahida iyo talooyinka bulshada Delridge, oo ay ku jiraan:

- Meelo baabuurta ku kala leexato oo ku yaalla 26th Ave SW Xaafadda Greenway ee SW Genesee St iyo SW Brandon St
- Sare u qaadidda xarumaha is dhinac yaal ee xaafadda greenways iyo hagaajinta isku xirka Delridge Way SW

- Ku soo kordhinta jardiinooyin dhexe oo si joogto ah gacanta loogu heyn doono ka dib marka dhismuhu dhamaado
- Dhisidda meelo jidadka laga gooyo iyo calaamad seddex geesood oo nalal ka iftiimayaan ee SW Hudson St taasi oo baarking u oggolaaneysa baabuurta bas leenka xilliga socodka yar yahay.




QAABKA MUUQAALLADIISA

Waxanu u qaabeynay Delridge Way SW si isu dheelli-tirta baahida dadka isticmaala jidkaasi, ha ahedeen kuwa bas raaca, gaari wata, lugeynaya, ama baaskiil wata.

HADDA JIRA


SW Andover St – SW Alaska St




SW Alaska St – SW Hudson St




SW Hudson St – SW Juneau St



SW Juneau St – SW Myrtle St



SW Myrtle St – SW Holden St



SW Holden St – SW Cambridge St



LAGU TALIYEY




(Eegaya Wuqooyi)




(Eegaya Wuqooyi)



(Eegaya Wuqooyi)



(Eegaya Wuqooyi)



(Eegaya Wuqooyi)




(Eegaya Wuqooyi)

Bixinta hoy macno leh



SW Andover St



SW Andover St



SW Findlay St

Booqo mashruuca website-keena si aad u aragto faah-faafinno badan oo ku saabsan horumarka lagu sameynayo meelaha dadku ku socdaan, baaskiilka ku raacaan, iyo ka raacaan basaska, iyo sidoo kale isbeddellada ku imanya parkinnada ku teedsan waddada. www.seattle.gov/Transportation/DelridgeTransit

U diyaar-garowga dhisitaanka

Waannu fahamsannahay in dhisitaanku ahaan karo mid dhawaq dheer iyo saameyn yeesha. Iyadoo maanka lagu hayo bulshada Delridge, waxanu diyaarinay tilmaamo si kuwa kontraaddeena heysta u awoodaan iney yareeyaan suurto-gelnimada saameyn ka dhalata dhisidda ku yeelan karto bulshada. Tilmaamahaasi waxay ka yimaadeen in ka badan 4 sano oo bulshada lala xiriiriyey iyo xaafadda Delridge. Qaar ka mida tixgellinnadaasi waxa ka mida:

- U gaar yeelis waqti dheeraad ah tarjumidda ogeysiisyada muhiimka ah sida xiritaannada waddooyinka lagu leexdo.
- Yareynta ama xaddidaadda shaqada waqtiyada maalmaha ciidaha iyo dabaal-deg dhaqameedyada.
- Ka sameyn si ku meel gaar ah meelo jidadka laga gooyo ee aagga waddada Delridge Way SW meelahaasi oo waddooyinka socodka la xiray waqti dheer. Meelahaasi waa la iftiimin doonaa, waxana ku jiri doona calaamado rinji lagu sameeyo oo waddada dusheeda ah, iyo meelo curyaammada mari karaan.
- Isku dubbarridka shaqooyin laymanka kale sida utility ee Louisa Boren K-8 school.
- Xoog saarid siyaasadda daris wanaagga "good neighbor" oo ku jaheysan koontoraadleyda, taasi oo ay ku jirto nadiifinta goobta iyo tixgelin sare u qaadis.

Ma ku nooshahay ama meel u dhow Delridge Way SW mana dooneysaa warbixinno aad ku hesho luqaddaada?

Haddii aan ku nooshahay Delridge Way SW, fadlan filo shaqooyinka ka socda gurigaaga hortiisa ama meelaha u dhow. Shaqadani waxey mararka qaar xiri kartaa waddooyinka lagu leexdo, waddooyinka socodka, ama waxey socon karaan habeenkii. Haddii aad email inoogu soo dirto magacaaga, adreeskaaga, iyo sida ugu wanaagsan ee lagula soo xiriiri karo, waxanu ku turjumi karnaa warbixinnada dhismaha cinwaankaaga waxanuna kugu soo diri doonnaa email.

Fadlan email noogu soo dir DelridgeTransit@Seattle.gov

Su'aalo?

Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan mashruucan, fadlan ha ka shakin inaad nala soo xiriirto!

Delridge Transit Outreach Team

DelridgeTransit@Seattle.gov | 206-775-8739
www.seattle.gov/Transportation/DelridgeTransit

Maxaad filan kartaa waqtiga dhismuhu socodo

Xilliga mashruucu dhismihisu socdo laga bilaabo summer 2020 ilaa 2022, fadlan filo:

- Waqiga guud ee shaqada socoto laga bilaabo 7 AM ilaa 7 PM maalmaha toddobaadka
- Dhawaq, boor, iyo baabuur aad u waaweyn oo socda
- Baarkinnada oo si ku meel gaar ah loo xayiro
- Muddooyin kooban oo biyaha la xiro. Hore ayaa la idiin ogyesiin.
- Saameyn ku meel gaar ah waddooyinka baabuurta ku leexato
- Shaqooyin la qabto habeennadii iyo maalmaha todobaadka dhamaadkiisa si loo yareeyo saameynta baabuurta socodkooda
- Xiritaanno buuxa oo lagu sameeyo isgoysyo qaar weekends-ka
- Xiritaanno ku meel gaar ah waddooyin dhinaceedyo
- Mararka qaar oo baabuurta leexin lagu sameeyo
- Is beddello Laymanka baabuurta lagu sameeyo goobaha dhismaha
- Leexisyo lagu soo rogo lugeeyayaasha iyo baaskiillada goobaha dhismayaashu ka socdaan
- Dad calamo lula oo caawiya jiheynta baabuurta haddii loo baahdo
- Leexinno iyo raris ku meel gaar ah basaska iyo goobaha laga raaco

Badqabka Mashruuca Buundada Sare u kacsan ee West Seattle

Waxanu ka warheynaa saameynta xooggan ee imika ku wajahan West Seattle waxanuna si wada jir ah ula shaqeynoynaa Badqabka Mashruuca Buundada Sare u kacsan ee West Seattle. Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan mashruucan, fadlan la xiriir:

Phone: 206-684-7623

Email: 684-Road@seattle.gov

The project is funded by KC Metro and SDOT's 9-year Levy to Move Seattle, approved by voters in 2015. Learn more about the levy at www.seattle.gov/LevytoMoveSeattle.